**Waaxda Guryaynta iyo Horumarka Bulshadda (DHCD)**
**Waaxda Guryaynta Degenaanshaha (DHS)**
**Barnaamijka Caawimada Degdega ah (EA)**

**Barnaamijka Shuruucda Xarunta Hoyga Midaysan**

Sharciyada dhaqan gelaya Janaayo 2, 2015. Xarumaha hoygu waxa aysoo dhejinaysaa Shuruucdan Midaysan iyo taariikhda dhaqan galka**. Sharciyadan waxaa lagu dabaqayaa labbadaba xarumaha iyo goobaha lagu xoonsanyahay iyo goobaha firidhsan, iyo meelaynta hudheelada, laga reebo sida la sheegay.**[1] Shil keliya oo looga fekeri karo sidii xad gudub oo ah labba ama in ka badan oo Sharciyada Xarunta Hoyga ah, ama mi dama ka badan oo Shariyada Xarunta Midaysan ah iyo ku xad gudubka qorshaha dib u guriyaynta ee waafaqsan 760 CMR 67.06 (5) (a) 3. ama halis ku ah caafimaadka iyo badbaada waafaqasan 760 CMR 67.06 (5) (a) 3. ama 760 CMR 67.06(6)(a)1, waxaa loo tirin doonaa sidii xad gudub keliya.[2]

**Mabaadi'da Hagaysa**

• Dhaqan aadaminimo ah oo tixgelin leh ee qoysaska, oo ay ku jirto sii wadista heer waxoogaa gaar ahaansho ah

• Caafimaadka iyo badbaadada martidda, shaqaalaha, iyo bulshada

• Ilaalinta ismaamulka qoysaska iyo kor u qaadka nolaansho madaxbanaan/isku filnaansho

• Maamul xarunta hoyga ah oo guul leg iyo maamulka barnamijka

---

[1] Ogow in, ilaa iyaddoo haddii kale la sheego mooyee, dhammaan tixraacyada xarumaha hoyga iyo shaqaalaha xarunta hoyga ee Sharciyada Midaysan waxaa lagu dabaqi doonaa shaqaalaha DHCD ama meelaha loo magacaabay ee meelaynta hudheelada. Sida lagu isticmaalay Sharciyada Barnaamijka Xarumaha hoyga Midaysa, "hudheel" waxa uu tixraacayaa hudheelada iyo hudheelada wadada ku dhinac yaal iyo "xarumaha hoyga," haddii aan si gaar ah loo qeexin. Macnaheedu waa xarumo hoy oo lagu xoonsanyahay ama firidhsan. Dhammaan tixraacyada Maamulka Isku xidhaha ama Caawiyaha Maamulaha waa in loo gudbiyaa Maamulaha Isku xidhaha ama Maamulayaasha Caawiyaha ee DHS.

[2] Haddii Shil kaliya loo aqoonsado labbadaba xad gudub Sharciyada Xarunta Hoyga Midaysan iyo wax halis ku ah caafimaadka iyo badbaada ee waafaqsan 760 CMR 67.06 (5) (a) 5. ama 760 CMR 67.06(a)1., labbada xad guduba waa in lagu hubiyaa Codsiga u Hogaansani la'aanta loo diray DHCD oo ay u soo direen xarunta hoyga iyo hudheelka. Xaaladaha, DHCD, waxay tirada ku darsan wax *waxa ugu yar* ama sababta difaacyada ugu wanaagsan ee lagu dabaqi karo xad gudubka Sharciyada Xarunta hoyga Midaysan marka ay ka fekerto haddii shilku uu ka dhiganyahay halis wax ku ah caafimaadka iyo badbaadada. Haddii Shil kaliya loo aqoonsado labbadaba xad gudub Sharciyada Xarunta Hoyga Midaysan iyo qorshaha dib u guryaynta ee waafaqsan 760 CMR 67.06 (5) (a) 3., labbada xad guduba waa in lagu hubiyaa Codsiga u Hogaansani la'aanta loo diray DHCD oo ay u soo direen xarunta hoyga iyo hudheelka. Xaaladaha sidan ah, haddii xad gudubku uu ku lug leeyahay arimaha laga hadlay Shuruudaha Sharciyada DHCD, sida soo xaadirka kullamada jadwalka loo sameeyay, shuruudaha Sharciga sidoo kale waa in lagu dabaqaa xad gudubka la tuhunsanyahay ee Xeerka. Haddii Shil kaliya loo aqoonsado labbadaba xad gudub Sharciyada Xarunta Hoyga Midaysan iyo wax halis ku ah caafimaadka iyo badbaada ee waafaqsan 760 CMR 67.06(5)(a)5. ama 760 CMR 67.06(6)(a)1., labbada xad guduba waa in lagu hubiyaa Codsiga u Hogaansani la'aanta loo diray DHCD oo ay u soo direen xarunta hoyga iyo hudheelka oo DHCD waa in ay siisaa ka qayb galaha fursad lagaga jawaabaya ka hor intaan la soo saarin Ogaysiiska u Hogaansani la'aanta oo waa in ay tirada ku darsataa wax sabab wanaagsan ah ama *de minimis* (ta ka yar) difaacyada wax sharci lagu dabqi karo ah.

## Gelitaanka Qaybaha/Baadhitaanada

Qololka iyo/xarumaha hoyga lagu xoonsanayahy, hudheeladana waxaa loo baadhi karaa nadaafada iyo khataraha caafimaadka bulshadda iyaddoo la haysto ugu yaran 24 saacadood oo ogaysiis ah ama hab si caadiya ah, haddii ogaysiis qoran oo ah jadwalka baadhitaanka caadiga ah la siiyo Qoysaska EA ugu yaraan 24 saacadood ka hor baadhitaanka caadiga ah ee u horeeya oo wax baadhitaanadaa caadiga ah jadwal looga sameeyo wakhti ka horeeya 8:00 fiidnimo. Ogaysiiska baadhitaanada waxaa ka mid ahaan doona muddo aan ka badnayn 3 saacadood muddada baadhitaan noocan ah la samaynayo. Taa waxa raaca, shaqaalahu waxay u haystaan 24 saacadood oo gelitaanka iyaddoon la siin ogaysiis hore dhammaan qaybaha EA, ay ka mid tahay laakiin aanay ku xadid nayn qoloolka hudheelada, (1) xaaladaha degdeg ah; iyo (2) ujeedada baadhitaanada ay sameeyaan wakaaladaha dowladdu masuul looga bandhigay dhaqan gelinta xeerarka dhismaha, xeerarka sixida, xeerarka dabka, ama xeerarka caafimaadka. Xaaladaha degdeg ah waxaa ku jira, laakiin aan ku xadidnayn, xaaladaha caafimaad ee degdega ah iyo xaaladaha degdega ah ee xarunta la xidhiidha sida dabka, tifqida biyaha, iyo cayayaan ku dhalashada.

Qaybaha EA, ay ku jiraan qololka hudheelada, waxaa u diyaar ahaan doona 24 saacadood oo ogaysiis qoran ah oo dayactir ah caadi ah gudaha 3 saacadood oo wakhti aan baanayn ah o uu ku jiro ogaysiisku, ama wakhti kale si wada jir ah la isugu raacay. Hudheelada, qolalka waa in loo diyaariyaa maalin kasta hagaajinta oo ay qabtaan shaqaalaha hagaajinta muddada wakhtiga saacadaha maalinta oo hore loo sii qorsheeyay gudaha wakhtu 3 saacadood ah oo an badnayn oo hore qoraal loogu sii siiyay ka qayb galayaasha jooga hudheelka oo laga heli kara miiska hore ee hudheelka, ama wakhti kale oo si wada jir ah la isugu raacay, laga reebo xaaladaha kuwaas oo qaban qaabada loo sameeyay Qoyska EA in ay nadiifiyaan qolkooda iyadoo ay ugu wacantahay naafo iyo, xalaadaha sidan ah, qolka waa in lagu diyaariyaa gudaha 24 saacadood oo ogaysiis qoran ah oo ah baadhitaanka nadaafada. Diiditaanka nadiifinta qolka ay keento xanuun sidoo kale waa la ogalaan karaa, laakiin waa in aanay ka badnaan sadex maalmood oo isku xigta.

Taa waxa raaca, shaqaalaha xarunta hoyga, shaqaalaha hudheelka, shaqaalaha DHCD, iyo shaqaalaha qandaraaslayaasha DHCD iyo wakaalado kale oo gobolka ahaoo la shaqaynaya DHCD ayaa leh gelitaanka degdega ah ee qaybaha xarunta hoyga, oo ay ku jiraan qololka hudheelka kuwaas oo la geeyo ka qayb galayaasha EA, xaaladahoo dhan taas oo (1) ay haystaan sabab macquul ah, shaki hadal ahaan lagu soo qaadi karo in xubin qoyska EA ka tirsan uu hadda gacmaha kula jiro dambi; uu hadda sigaar cabbayo, oo wax ku karinayo qalab aan la ogalayn, ama uu martiqaaday marti aan la ogalayn; ama hadda uu ka qayb qaadanayo fal ka dhiga dhibaataynta raaxada degen ee dadka kale ee ka mid ah EA ama martida hudheelka ama halis ku ah caafimaadka badbaada dadka kale ee degen, xubnaha qoyskiisa/keeda, dadka kale ee EA ka tirsan ee ku jira xarunta hoyga ama hudheelka ee dhismaha taas oo goobta qaybaha firidhsan ay ku taal, ama martidda/shaqaalaha hudheelka xarunta hoyga ama hudheelka, shaqaalaha DHCD, ama shaqaalaha qandaraaslayaasha DHCD iyo wakaalada kale ee gobolka la shaqeeya DHCD, iyo (2) dhaqanka laga shakisanyahay oo aan lagu dabiibi karin booqasho goobta ah oo ku lug leh garaac albaabka ah oo keliya iyo codsi ah in lala hadlo kuwa gudaha ku jira.

Dhamaan xaaladahoo dhan, halkaas oo gelitaanka, ay ka mid tahay gelitaan degdeg ah iyo hagaajin guri oo caadi ah, la ogolyahay, shaqaalaha xarunta hoyga, shaqaalaha hudheelka, shaqaalaha DHCD, shaqaalaha qandaraaslayaasha ee DHCD ama wakaalade kale oo gobolka ama gudaha ah oo la shaqaynay DHCD ayaa garaaci doono albaabka laga galo, sheegi doono doonista gelitaankooda, oo siin doona dadka degen fursadda ay ku furaan albaabka gelitaanka ka hor. Laga reebo gelitaan degdeg ah waxaa lagu ogolyahay sharcigan shaqaalaha xarunta hoyga, shaqaalaha hudheelka, shaqaalaha DHCD, shaqaalaha qandaraaslayaasha ee DHCD ama wakaalade kale oo gobolka ama gudaha ah oo la shaqaynaya DHCD waxay yeelan doonaan gelitaanka qaybaha 24 saacadood oo oagysiin hore oo qoran ah oo ah booqasho loogu talo galay gudaha xiliga wakhti 3 saacadood ah.

Wax albaabo ah oo ku yaal hudheelka ama qaybta xarunta hoyga, waa la furi karaa midda baadhitaanka caadiga ah ama xaalada degdega ah. Alaabka shakhsi iska leeyahay ee ku jirta kabadhadda iyo khaanadaha lama taaban doono, laga reebo sida uu sharcigu ogolyahay, oo waxaa looga tegi doonaa xalaad habaysan ka dib wax baadhitaan la ogolyahay. Alaabta shakhsi iska leeyahay ee ku jirta kabadhadda iyo khaanadaha waa labaadhi karaa, laakiin keliya sabab macquul ah, shaki laga hadlo karo oo ah jiritaanka fal dambiyeed, walxo uu ay mamnuuceen sharciyadan, ama isticmaalka kulaylis mamnuuc ah ama qalab wax karinta ah. Caddaynta leh sabab aan qornayn oo baadhitaanka kabadhada ah la siiyo xubin qoyska EA ka hor baadhitaanka ma banaana in la soo raaciyo caddayn u hogaansami la'aanta DHCD ama joojinta dhagaysiga. Baadhitaanka kabadhadda waxaa lagu samayn karaa shaki macquul ah iyaddoo uu joogo xubin ka tirsan Qoyska EA, sababta qoran ee baadhitaanka waxaa a siin doonaa xubnaha Qoyska ka hor baadhida. Haddii xubin aan ahayn Qoyska EA uu jooga muddada baadhitaan sidan ah, sababta qoran waxaa lagaga tegi doonaa qolka.

Laga reebo ilaa xadka lagu bixiyay sharcigan, shaqaalaha xarunta hoyga looma ogola in ay badhaan ta alaabta shakhsiyeed ee qoysaska EA. Shaqaalaha xarunta hoyga, waxaa dhici karta, si kastaba ha ahaatee, in ay wacaan booliska markay u arkaan in ay habboontahay haddii ay hayaan sabab macquul oo ah shaki laga hadlo karo oo xubin Qoyska EA ama booqdo uu ku lug leeyayahy fal dambiyeed, uu hub ku haysto dhismaha, ama haddii kale uu khatar ku yahay caafimaadka ama badbaada dadka degen xarunta hoyga ama shaqaalaha. Duruufaha sare, marka shaqaalaha xarunta hoygu go'aansado in halis degdeg ah oo caafimaadka ah ama badbaadada dadka degen xarunta hoyga ama shaqaalaha ay jirto, caddaynta burburinta ay dhici karto, qofka shaqaalaha sare ee xarunta hoyga jooga dhismaha, ama wakhtiga baadhitaanka qaybta isaga laftiisa/lafteeda, waxa uu awood u leeyahay in u sidaas sameeyo iyaddoo waafaqsan walaacyada badbaada, ama waxa uu ogolaansho siinayaa booliska ku hawlan baaditaanka qayb kasta. Qofkan shaqaalahan sare ee xarunta hoyga sidoo kale waxa uu ogaalaansho siinaya baadhitaanka qaybta ee booliska marka uu qofkani haysto shaki macquul ah sida in baadhitaanku lagu heli wax shay ah (1) oo ah in ay dhici karto in ay sababto waxyeelo halis oo degdeg ah ama in loo isticmaali karo ujeedooyin dambiyeed (ay ka mid tahay, laakiin aan ku xadidnayn, hubka), (2) iyo shaqaalaha aan si sharci ah u haysan. Wixii duruufa ah ee lagu sifeeyay xaga sare, marka shaqaalaha xarunta hoygu waco booliska, sidoo kale waxay xayiri karaan gelitaanka qaybta Qoyska EA ilaa boolisku yimaado iyo, ka dib imaanshaha booliska, ilaa xadka uu boolisku codsado.

### Daryeelka Ilmaha marka waalidku maqanyahay/Daryeelka Ilmaha

Sharcigan waxaa lagu dabaqayaa daryeelka ilmaha goobta ah ama daryeelka ilmaha xarunta hoyga. Daryeelka ilmaha ka baxsan goobta ma daboolayo sharcigani, waxaana la ogol yahay ilaa inta aanay munaasab ku ahayn qorsha dib u guriyaynta ee Qoyska EA.

Gudaha labba (2) maalmood oo meelayn hore ah, Qoys kastoo EA ah waxaa la siin doonaa nuqul foomka lagu codsanayo daryeelka ilmaha markuu waalidku maqanyahay.

Qof wayn ama ilmo da'diisu tahay 16 ama ka wayn iyo, gudaha hudheelka, sidoo kale ah qofka degan isla hudheelka, waxaa loogu fasaxay ogolaansho ama sabab wanaagsan oo uu go'aamiyay 760 CMR 67.06(6)(a)5 si uu u daryeelo carruurta Qoys kale oo EA ah.

Ilmo da'diisu tahay 14 ama ka wayn waxa uu daryeeli karaa naftiisa/teeda ama xubin yar oo isla Qoyska EA ah isagoo haysta ogolaanshaha ama sabab fiican oo ay go'aamisay 760 CMR 67.06(6)(a)5. Haddii daryeelaha ilmaha (ama ilmaha loo ogolaaday daryeelka naftiisa/teeda) uu ka yar yahay 16 sano, wax daryeel ilmaha ah ama is daryeel waa in uu ka dhacaa qaybta loo magacaabay ee Qoyska EA ama marka daryeelaha ilmahu uu ka socdo walaalo ka da'yar, ku socda oo ka imanaya goobta soo qaadida/meesha gaynta si uu ula kulmo gaadiidka ilaa dugsiga ah, hawlaha dugsiga la xidhiidha, ballamaha caafimaad, booqasho la ogolyahay oo xubnaha qoyska ah, ama ballamo kale oo la xidhiidha caafimaadka, badbaada, ama daryeelka. Haddii daryeelaha ilmaha ama ilmo daryeelaya isaga- ama iyada uu ka yaryahay 18, xubin qof wayn aha oo ka tirsan qoyska carruurta la daryeelayo

ama daryeelaysa isaga- ama iyada ayaa joogi doono (i) dhismaha oo codka qaylada ilmaha ama (ii) si degdega uu u gaadhi karo daryeelaha ilmahu ama carruurta telefoon ahaan oo si degdega u soo noqon kara haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah.

Qaban qaabadal a ogolaaday mid uun bay noqon kartaa mar keliya ama qaban qaabo socota/xili dheeraada. Daryeelka ilmaha habeen dhax ah lama ogolaan doonaa iyaddoo loo ogolaado sababaha mooyee kuwaas oo ogolaada soo noqosho wakhti dambe ah lagu soo noqdo xarunta hoyga bandoowga ka dib ama sabab wanaagsan oo uu go'aamiyo 760 CMR 67.06 (6) (a) 5.

Xarunta hoyga, daryeelaha ilmahu waa in uu (i) ogolaaday shaqaalaha xarunta hoyga oo (ii) waafaqsanyahay Xeerarka Daryeelka Ilmaha DHCD, ay ka mid tahay heshiis qoran oo daryeelka ilmaha ku yaala foomka heerka DHCD oo uu saxeexayo madaxa Goyska EA, daryeelaha ilmaha, iyo shaqaalaha xarunta hoyga.

Hudheelada, qoysaska waxa ay dhammaystiri karaan foomka codsiga daryeelka ilmaha ee miiska hore ee hudheelka oo hudheelkuna isla markaaba waxa uu u diri doonaa fagas qofka habboon ee loo magacaabay ee Maamulka Isku xidhaha (oo siinaya caddayn qoyska EA in ay sidaas sameeyeen) kaas oo ogolaan doona daryeelka ilmaha markuu waalidku maqanyahay/qaban qaabooyinka daryeelka ilma meesha goobta shaqaalaha. Xogta ku saabsan cidda uu yahay Maamulaha Isku xidhaha ah iyo sida loola xidhiidho isaga/iyadda waxay heli doona dhammaan ka qayb galayaashu miiska hore ee huteel kasta. Cidda uu magaacaay Maamulaha Isku xidhaha ah waxa uu ka jawaabi doonaa codsiga ka qaybgalaha la dhigay hudheelka si loogu ogolaado daryeelka ilmaha gudaha labba maalmood oo shaqo laga bilaabo codsiga. Haddii aan jawaab lagu helin labba maalmood oo shaqo gudaheed ama ka hor wakhtiga loo baahday ee daryeelka ilmaha marka baahidu soo baxdo in ka yar labba maalmood oo shaqo ka hor wakhtiga daryeelka ilmaha lagu talo bixiyay, qaban qaabada daryeelka ilmaha lagu talo bixiyay waxay socon doontaa intaan jawaabtu dhinac u dhicin, laakiin codsiga lagu sameeyo in ka yar labba maalmood oo shaqo ogaysiiskeed waa in ay ku jirtaa sababo wanaagsan oo ah sababta codsiga daryeelka ilmaha aan lagu samayn ugu yaraan labba maalmood oo la soo horaysiiyo oo codsiga waxa dhici karta in lagu diido gudaha labba maalomood oo shaqo laga bilaabo taariikhda codsiga. Ka qayb galayaasha sii wata daryeelka ilmaha iyagoon soo horaysiin ogolaanshaha sidaas lagu samaynayo iyagoo fahansan inaan qaban qaabada la ogolaan doonin doonin. Ka fekerka codsiyada daryeelka ilmaha, ay ka mid yihiin xaaladahan ka dib u eegida dhabta ah, ogolaanshaha lama diidi doono iyaddoo aan la sheegin sababo wanaagsan. Ka qayb galayaasha gudaha hudheelada waa in ay isticmaalaan daryeelaha ilmaha kaas oo sidoo kale ah ka qayb gale EA la dhigay isla hudheelka sidii Qoyska EA ee helaya adeegyada daryeelka marka waalidku maqanyahay. Cidda uu magacaabay Maamulaha Isku xidhahu ama shaqaalaha xarunta hoyga waxa uu diidi karaa ogolaanshaha adeegyada daryeelka ilmaha sababo wanaagsan awgood, iyadoo xisaabta lagu darsanyo baahiyaha Qoyska EA, sida uu go'aamiyo cidda uu magacaabay Maamulka Isku xidhaha ahi ama shaqaalaha xarunta, oo ay ku jirto caafimaadka, badbaadada, daryeelka ilmaha, iyo kormeerid habboon oo carruurta ah, taariikhda dhibaataynta Qoysaska kale ee EA. Go'aanka cidda uu u magaacabay Maamulka Isku xidhaha ahi ama shaqaalaha xaruntu hoygu qaababkan waxa dhici karta in wargelin laa bixiyo u hogaansanaan la'aan hore oo ah agabka sharciyada. Wixii codsi rafcaana maamuleed ah ee u hogaansanaan la'aan ama joojin oo ku salaysan daryeelka ilmaha aan ogolaansho lahayn ama daryeelka ilmaha, ku guul daraysiga DHCD in ay ogolaato daryeelka ilmaha marka waalidku maqan yahay oo la ogolaaday waxaa dib loogu eegi karaa sababaha lagu sheegay M.G.L. c. 30A, § 14 (7), oo ay ku jiraan laakiin aanay ku xadidnayn, heerarka dib u eegida ee maxkamadda hoose.

Laga reebo xaaladaha sababo fiican, sida waafaqsan heerarka sababaha wanaagsan ee 760 CMR 67.06(6)(a)5, daryeelka ilmaha waxaa la ogolyahay oo keliya si waafaqsan Sharciga iyo wakhtiga la ogolaaday. Go'aaminta haddii sabab wanaagsan sida lagu go'aamiyay 760 CMR 67.06(6)(a)5 ay jirto, DHCD waxay ka fekeri doontaa dhammaan duruufaha ay ka mid tahay da'da ilmaha(carruurta) iyo inta uu leegyahay wakhtiga daryeelka ilmaha aan la ogolaan, inta uu leegyahay wakhtiga uu daryeelka ilmahu dhaafsanyahay wakhtigii la ogolaaday, iyo ilaa xadka daryeelka ilmaha aan la ogolayni halis gelinayo ama si xun u saamaynayo caafimaadka, badbaadada, iyo daryeelka ilmaha(carruurta). Iyaddoo wax lagu soo celceliyay ah mooyee, xad gudubka Sharcigan oo ah *de*

*minimis* (ta ka yar), sida la go'aamiyay iyaddoo ku salaysan dhammaan duruufaha la xidhiidha, sida wakhtiga, da'da ilmaha iyo halista ilmaha, looma xisaabin doono sidii u hogaansami la'aan ama joojin.

Daryeelaha ilmaha la ogolaaday waxaa looga baahanyahay in uu u hogaansamo xeerarka barnaamijka iyo Barnaamijka Hoyga ee Midaysan iyo sharciyada hudheelka ay dejisay DHCD muddada wakhtiga uu isaga ama iyaddu daryeelayo ilmaha(carruurta). Daryeelaha ilmahu waxa uu waafaqayaa edaabta EA ilaa xad in ilmaha(carruurta) waalidka uu noqon lahaa haddii isaga ma iyadu uu ku guul daraysto in uu si habboon u kormeero ama bixiyo caafimaadka iyo badbaadada ilmaha(carruurta).

Wax qaban qaabo daryeelka ilmaha waa in loo hogaansamaa Sharciga Bandoowga, sida la filayo haddii kale la ogolaaday ama sabab wanaagsan oo waafaqasa sababta wanaagsan ee heerarka 760 CMR 67.06 (6) (a) 5. Maqan duruufo gaar ah loo ogolaaday oo lagu faahfaahiyay Sharciga Badoowga ee ku habboon marka waalidka ilmahu loo ogolyahay in uu soo noqdo badoowga ka dib, ama sabab wanaagsan oo lagu faahfaahiyay kor, daryeelaha ilmahu ma daryeeli doono bandoowga ka dib, ama ka hor 6:00 subaxnimo. Lyaddoo ah mid soo noq noqta mooyee, xadgudub Sharcigan ah taas oo ah *de minimis* (ta ka yar), sida la go'aamiyo ee ku salaysan dhammaan duruufaha la xidhiidha, sida wakhtiga, goobta, da'da ilmaha oo halis ku ah ilmaha, looma tirin doono sidii u hogaansami la'aan ama joojin. Ogolaanshaha daryeelka ilmaha ka dib bandowga ka dib ama ka hor 6 subaxnimo waa in si gaar ah loogu codsadaa heerka DHCD ee ka yimid Heshiiska Daryeelka Ilmaha muujinya sababta badowga ka dib ama ka hor 6 gelinka hore daryeelka ilmahu ay lama huraan u tahay.

### Daryeelka Carruurta

Xubnaha da'da waa wayn ee Qoyska EA iyo wixii waalidka kurayda ah ee ilmaha ee ku jira Qoyska EA waxa ay masuul ka yihiin siinta caafimaadka, badbaadada, iyo daryeelka ilmo kasta/carruur ee ku jira qaybta EA (tusaale, u hogaansanaanta soo xaadirka dugsiga, hubinta in carruurta si sax ah loo quudiyay unana nasteen). Masuuliyadan sinaba looma yareeyo marka Qoyska EA uu goobta ka maqanyahay, tusaale, habeen dhixitaan la ogolyahay, ama maxaayeelay Qoyska EA waxa uu u hogaansamay sharciyada xarunta hoyga, sida bandowga. Iyaddoo wax lagu soo celceliyay ah mooyee, xad gudubka Sharcigan oo ah *de minimis* (ta ka yar), sida la go'aamiyay iyaddoo ku salaysan dhammaan duruufaha la xidhiidha, sida wakhtiga, goobta, da'da ilmaha iyo halista ilmaha, looma xisaabin doono sidii u hogaansami la'aan ama joojin.

### Ilmaha laga tegay iyaddoo la Daryeelayn

**<u>Digniin: Waaxdu waxay uga fekertaa in ilmahu keli yahay haddii xataa in kooban muuqa ka baxo, maqalka, ama maamulka degdega ah ee daryeel bixiyaha qofka wayn ah ama daryeelaha ilmaha la ogolyahay.</u>**

Caruurta ku jirta Qoyska EA keligood lagama tegi doono iyagoon ciddi hayn xarumaha hoyga ama dhsimaha hudheelka, laga reebo haddii la ogolaado bixita daryeelkooda ilmaha ee waafaqsan Shariga Daryeelka ilmaha marka waalidku maqan yahay, ama booqashada goobo guud ilaa xadka uu u ogolyahay Sharcigu Booqdaha/Martidda, ama loogu cudur daaro sidii sabab wanaagsan sida uu go'aamiyo ee waafaqa sababta wanaagsan ee heerarkan 760 CMR 67.06(6)(a) 5. Ilmaha loo ogolyahay in uu bixiyo daryeelkiisa ama daryeelkeeda waxa ay hoos iman doonaan Sharciga Daryeelka ilmaha markuu waalidku maqanyahay/Daryeelka ilmaha. Ka fekerka sababaha wanaagsan ee ay soo qaadeen ka qayb galayaashu ee ka tegista ilmaha iyaddoo la daryeelayn, DHCD waxay ka baaraan degi doonaa dhammaan duruufaha ay ka mid yihiin da'da ilmaha(carruurta) iyo dherarka wakhtiga in ilmaha(carruurtu) uu yahay (ay yihiin) kuwo aan la daryeelayn. Iyaddoo wax lagu soo celceliyay ah mooyee, xad gudubka Sharcigan oo ah *de minimis* (ta ka yar), sida la go'aamiyay iyaddoo ku salaysan dhammaan duruufaha la xidhiidha, sida wakhtiga, goobta, da'da ilmaha iyo halista ilmaha, looma xisaabin doono sidii u hogaansami la'aan ama joojin.

## Bandoow

Qoyska EA waxay u hogaansami doonaan wixii bandoow ah ee ay soo rogto xarunta hoygu ama huteelku, xaaladu kay tahayba bandoowgu imaanshaha dhismaha waa in aanu ka soo horayn 9:00 habeenimo dhammaadka wiigaga (Fiidadka Axada- Khamiista) iyo 11:00 habeenimo dhammaadka wiigaga (Fiidadka Jimcaha- Sabtida) oo waa in aanu ka dambayn 11:00 habeenimo (Fiidadka Axada- Khamiista) iyo 1:00 subaxnimo ee habeenka (Fiidadka Jimacaha & Sabtida). Xarumaha hoyga loogama baahna in ay beddelaan barnaamijkooda ama jadwalada cuntadda iyaddoo ay ugu wacantahay bandoowgu.

Xarunta hoygu ama huteelku waxa uu soo rogi karaa wakhti degen si loo bilaabo in aan ka badnay hal saac ka hor wakhtiga bawndoowga. Xaunta hoyga ama huteelku waxa uu ku soo rogi karaa bandoow qolka gudahiisa ah xubnaha Qoyskaka EA si ay u joogaan qololka loo magacaabay, si loo bilaabo hal saac ka dib bandoowga imaanshaha dhismaha. Ka reebitaanada bandoowga qolka gudahiisu waxaa loo samayn doonaa caafimaad macquul ah, badbaado, iyo baahiyaha daryeelka, haddii ka qayb galaha EA uu siiyo sabab wanaagsan xarunta hoyga ama shaqaalaha hudheelka oo uu ugu baxayo baahiyahan ka dib saacadaha bandoowga qolka, taas oo ay ku jiri doonto soo noqosho daah ah oo shaqada ah ama waxbarashadda.

Bandoowga qolku waxa ay dhammaan doontaa wakhti aan ka dambayn 6:00 subaxnimo.

Wax bondoow ah waa in loogu habboonaysiiyaan hab xaalad – xaalad ah shaqada Qoyska EA ama jadwalka dugsiga , qorshayaasha waajibaadyada dib u guriyaynta, iyo n hoy la siiyo naafadda ama sababo kale sida uu go’aamiyay 760 CMR 67.06(6)(a)5.

Ka reebitaanada gaarka ah ee shuruudaha bandoowga waxaa ogolaan kara shaqaalaha xarunta hoyga ama hudheelka ama qofka uu magacaabay Maamulaha Isku xidhku hab xaalad-xaalad ah, sabab wanaagsan oo keliya, sida ciyaaro jadwal leh, dugsi,kaniisad, ballan caafimaad, iyo hawlaha bulshadda ama sababo wanaagsan oo la mid ah.

Codsiga wax ka beddelka bandoowga waxaa samanayo mid uun shaqaalaha hoyga ama qofka uu magacaabay Maamulaha Isku xidhku, kaas oo xogtiisa xidhiidhka laga helo kara xarun kastoo hoy iyo huteel. Haddii codsiga wax ka beddelka bandoowga la sameeyo labba maalmood oo shaqo ka hor taariikhda ku habboonaysiinta loo baahaynyahay, codsigu waxaa loo arki doonaa in la ogolaaday iyaddoo si cad loo diido mooyee.

U hogaansanaata wakhtiyada bandoowga kama yaraynayso xubnaha Qoyska EA masuuliyada dhammaystirka hawlahooda xarunta hoyga iyo siinta, caafimaad, badbaado, iyo daryeelka carruurta Qoyska EA.

Imaanshaha goor dambe badoowgu iyaddoon hore loo sii ogolaan waxaa loogu cudur daari karaa sabab wanaagsan oo waafaqsan heerarka 760 CMR 67.06(6)(a)5. Ka fekerka sababaha wanaagsan ee ay soo qaadeen ka qayb galayaashu ee imanaashaha goor dambe xiliga bandoowga, DHCD waxay ka baaraan degi doontaa dhammaan duruufaha, ay ka midka yihiim qadarka habsanka, wax iska warbixin habsanka ah sidii tilmaan masuuliyadeed, iyo saamaynta mustaqbal ama dhabta ah ee goor dambe soo noqoshadu ay ku leedahay caafimaadka, badbaada iyo daryeelka ilmaha(carruurta). Iyaddoo wax lagu soo celceliyay ah mooyee, xad gudubka Sharcigan oo ah *de minimis* (ta ka yar), sida la go’aamiyay iyaddoo ku salaysan dhammaan duruufaha la xidhiidha, sida wakhtiga iyo goobta looma xisaabin doono sidii u hogaansami la’aan ama joojin.

## Waxyeelada Hantidda iyo Kharashaadka

Xubnaha Qoyska EA ma waxyeelayn karaan xarunta hoyga ama dhismaha hudheelka ama ma qaadan karaan hantidda xarunta hoyga ama hudheelka, aan ka ahayn hantidda loogu talo galay ku adeegsi, la’aanta sabab wanaagsan sida la go’aamiyay ee waafaqsan 760 CMR 67.06 (6) (a) 5. Jajabka dilaaca iyo xoqniinka iska caadiga

ah ee guriga gaadha loogama fekero waxyeelo. Ilaa waxyeelada loo gaysto ula kac ahaan, feejignaan la'aan ama ku cel celis ahaan, Qoyska EA kaas oo u hogaansama qorshe lacag bixin macquulku si uu u magdhabo qiimaha beddelka ama dib u hagaajinta hal sano gudaheed waxa hayn doonaa u hogonaansanaan la'aanta ilaa magdhowga loo bixiyo si buuxda, haddii dhammaan lacagta lagu bixiyo wakhtiga habboon. Haddii magdhowga si buuxda loogu bixiyo wakhti habboon oo waafaqsan qorshaha magdhowga, u hogaansanaan la'aanta waa la laali doonaa.

Qoyska EA waa in uu bixiyaa dhammaan kharashka waxlaha dheeraadka ah ee la heli karo oo aanay ku jirin dheefaha xarunta hoyga ama hudheelka. Tan waxaa ku jiri kara wicitaanada telefoonka laga diro xarunta hoyga ama laymanka hudheelka ama filimadda kirada ah. Dadka degen EA lama xisaabin doono kharashka wicitaanada telefoonka ama kharashaadka kale ee hudheelka martidda kharashka iska bixisa lama xisaabin doon adeegyada sidan ah. Xarunta hoyga ma huteelku waxa uu u hore sheegi doonaa Qoyska EA iyaddoo qoran waxa ay yihiin hawlaha kharashka loogu soo dalaci doonaa. Hudheelada iyo xarumaha hoyga waxa ay ogolaan doonaan Qoyska EA kaas oo aan haysan telefoonka gacanka in uu isticmaalo telefoonka xafiiska ama qof kale oo magacaaban si uu wax uga waco xaaladaha degdega ah ama duruufo kale oo khasbaaya, sida la xidhiidhka shaqaale dib u guriyayn ah ama u baahashada ogolaansho dhixitaan habbeeno ah ama ogolaansho daryeelka ilmaha.

Maqnaanshaha sabab wanaagsa sida ku dhigan 760 CMR 67.06(6)(a) 5, Qoyska EA waa in ay siiyaan kharashka hantidda xarunta hoyga ama hudheelka ee ka maqan qaybta iyaddoo sababtu tahay dhaqanka Qoyska EA ama wax waxyeelo ah oo ay gaysteen wax xubin ah oo Qoyska EA ah ama martiddooda oo ka baxsan jajabka, xoqniinka guriga ee caadiga ah. Tan waxaa ku jiri kara kharashka nadiifinta haddii qayb gaar ahaan lagaga tago wisikh ama xaalada aan si wanaagsanayn. Lacag bixinta waa in ay ku dhacdaa wakhti macquul ah ka dib marka Qoyska EA lagu wargeliyo biilka qiimayaashan, laakiin wax qorshe magdhow ah waa in uu macquul ahaadaa iyaddoo lagu xisaabtamayo helitaanta Qoyska ee dakhliga iyo kharashaadka oo waa in lagu ladho qorshayaasha dib u guriyanta ah ee xubnaha dadka waa wayn ee Qoyska EA. Kharashyada la isku khilaafsanyahay iyo macquulnimada waxii qorshe magdhow ah waxay hoos imanayaan rafcaanka DHCD Qaybta Dhegaysiga ee macnaha guud ee rafcaanka maamul ee u hogaansami la'aanta ama joojinta ku xad gudubka sharciga. Iyaddoo wax lagu soo celceliyay ah mooyee, xad gudubka Sharcigan oo ah *de minimis* (ta ka yar), sida la go'aamiyay iyaddoo ku salaysan dhammaan duruufaha la xidhiidha, sida wakhtiga, da'da ilmaha iyo halista ilmaha, looma xisaabin doono sidii u hogaansami la'aan ama joojin.

**Shuruudaha DHCD oo ay ku Jiraan Ballamaha loo Baahanyahay**

Qoyska EA waxa uu u hogaansami doonaa dhammaan shuruudaha la dabaqi karo ee DHCD, oo ay ku jirto kuwa ku qoran qorshaha dib u guriyaynta (taas waxaa loola jeedaa, kaydinta, baadhitaanka guri, baadhida shaqada), ama, maqnaashaha qorshe dib u guriyayn ah, shuruuda ugu yaree qorsha dib u guriyaynta ee ku qoran 760 CMR 67.06(4)(b) ka dib ogaysiis qoran ama hadal ah oo la siiyo xubnaha dadka waa wayn ee Qoyska EA sida waxa ay yihiin shuradaasi iyadoo sida ay u buuxinayaan Qoyska EA.

Qoyska EA waxaa laga filayaa in ay yimaadaan dhammaan kullamada ay jadwalka u sameeyeen shaqaalaha xarunta hoygu, shaqaalaha DHCD, iyo qandaraaaslayaasha DHCD ee siinaya adeegyada daryeelka bulshadda ka qayb galayaasha EA. Ugu yaraan labba maalmood oo shaqo oo ogaysiis hore loo sii qoray waa in la siiyaa Qoyska EA iyaddoo uu kullankan sidan uu qayb ka yahay kullamo jadwalsan oo taxane ah mooyee oo lagu sheegay ogaysiis keliya, xaaladay ahaataba ogaysiis labba maalmood oo shaqo oo kullanka u horeeyaa ayaa ku filan. Ogaysiiska qoran waxa uu bixin doonaa lambar telefoon iyo fagas halka qofka codsanaya kullanku ay kala soo xidhiidhi karaan ka qayb galayaasha EA xaalada degdega ah ama sabab kale oo wanaagsan. Ka qayb galayaasha waca, fariimo u dira ama fagas u dira iyagoo codsanaya in ay dib jadwal ugu samaystaan ugu yaraan labba saacadood ka hor kullanka, haddii ka qayb galayaasha la siiyay lambarada telefoonka shaqaalaha kiiska ee ay khusayso, laguma heli doono ku xad gudub Sharciga ah ama ku xad gudubka iskaashiga maamulka ee qorshayaasha dib u guriyaynta. Haddii shaqaalaha ama adeeg bixiyaha u qorshaysanyahay kullanku uu daaho in

ka badan 15 miridh, ka qayb galaha laguma heli doono ku xad gudubka Sharciga 760 CMR 67.06(5)(a)3 joogid la'aan.

Qoyska EA waxaa laga filayaa in uu yimaado saacad macquul ah goobta hoyga ama hudheelka maalinta Qoyska EA la meeleeyo. Haddii Qoyska EA uu aqbalo in loo qaado DHCD, Qoyska EA waxa uu ka warbixin doonaa goorta iyo meesha la faray in uu gaadiid ka heli doono laga reebo sabab wanaagsan hadduu Qoyska EA codsado in uu yimaado meelaynta gaadiidkooda, waxay iman doonaa wakhti aan ka dambayn 8 habeenimo goobta xarunta hoyga lagu xoonsanyahay ama hudheelka ogolaansho la'aanta Maamulaha Isku xidhka Goboleed ama qofka uu isaga/iyaddu magacaabay, oo waxay iman doonaan wakhti aan ka dambayn 5ta galabnimo goobta xarunta hoyga adeeg bixiyaha qaybta firidhsan haddii meelaynta la siiyo ka hor 2:00 galabnimo iyaddoo adeeg bixiyahu hoygu ku war geliyo wakhti ka duwan mooyee ama meel ama sababo wanaagsan. Haddii qoyska EA aanu iman xarunta hoyga ama hudheelka wakhti habboon sabab wanaagsan la'aanteed ama ogolaanshaho, qolka waa la iska dhaafi karaa. Ogaysiiska meelaynta waxaa uu siin doonaa lambar shaqaynayo oo xidhiidha xarunta hoyga ama hiteelka ama DHCD in Qoyska au soo waci karaan si ay uga warbixiyaan baahida wakhti dambe oo imaansho ah sababo wanaasana ay sababeen.

Qoyska EA ee lagu meeleeyay hudheelada waxaa laga filayaa in ay soo wacaan hudheelka ama ay qof ahaan ugu warbixiyaan miiska hore 1 galabnimo galab kasta si loo ogaado haddii Qoyska EA loo rari doono xarun hoy ama in lambar telefoon lagaga tegi doono hudheelka halka Qoyska EA lagala xidhiidhi karo si loogu wargeliyo wareejinta.

Sabab wanaagsan oo u hogaansami la'aanta ah ee Sharcigan waxaa la go'aamin doonaa iyaddoo hoos imanaysa sababaha wanaagsan ee heerarka 760 CMR 67.06(6)(a)5. Iyaddoo wax lagu soo celceliyay ah mooyee, xad gudubka Sharcigan oo ah *de minimis* (ta ka yar), sida la go'aamiyay iyaddoo ku salaysan dhammaan duruufaha la xidhiidha, sida wakhtiga, da'da ilmaha iyo halista ilmaha, looma xisaabin doono sidii u hogaansami la'aan ama joojin.

### Dhibaatayta Raaxaysiga degen

Xubnaha Qoyska EA kama qayb qaadan doonaan dhaqan aan macquul ahayn taas oo leh saamaynta halis ahaanta dhibtaaynta maaddi ahaan raaxaysiga degen ee ka qayb galayaasha kale ee EA, degenayaasha kale ee goobta firidhsan ee dhismayaasha dabaqa ah, ama martidda kale ee hudheelka sabab wanaagsan la'aanteed sida lagu go'aamiyay ee waafaqsan 760 CMR 67.06 (6) (a) 5. Dhaqanka looga fekeray mid aan macquul ahayn kuma jiri doonto hawlaha nolosha ee maalin laha ah, sida qosolka, oohinta, wada sheekaysiga. Dhegaysiga telefeeshanka, raadyowga, ama muusiga, ku hadalka telefoonka, carruurta ka qayb qaata hawlaha ciyaarta caadiga ah, ama dhar dhaqista saacadaha macquulka ah (haddii la qorto), iyaddoo dhaqanku ku sii socdo in uu ahaado heer ka reebanaan leh mooyee ka dib ogaysiiska in dhaqankaas dhibaataynaya Qoyska EA oo kale, qof degen, ama marti. Mid halis ah oo maaddada dhibaataynta raaxaysiga degen ah kuma jiri doono ka cadhaysiimaha ay iska leedahay goobaha lagu noolyahay ee lagu xonsanyahay. Helitaanka meel lagu ciyaaro ama u dhow meesha waxaa looga fekeri doonaa go'aanshada haddii dhaqanka ilmaha loola dhaqmi doono sidii dhibtaayn ama rabshada raaxaysiga degen.

### Baadhitaanka Maandooriyaha

Baadhitaanka maandooriya, oo ay ku jirto baadhitaanka kaadidda iyo dhiiga iyo baadhitaanada neefta, laguma samayn doono si aan qorshaysnayn ama dhammaan ku saabsan; si kastaba ha ahaatee, Qosyak EA waxa uu u hogaansami doonaa waxiii codis shaqaale ah ee baadhitaanka maandooriyaha la sameeyo ka dib marka shaqaalahu ay sameeyeen mid la gaar yeelay oo shaki macquula ah in xubin qoyska EA uu isticmaalyo walax maandooriyo oo mamnuuc ah. Baadhitaan kastoo sidan oo kale ah waxaa lagu samayn doonaa kharashka xarunta hoyga.

## Badbaadada Dabka & Cabbista sigaarka

Sigaar cabbistu waa ka mamnuuca qayb kastoo xarunta hoyga ah ama dhismaha.

Ka saarida qalabka lagu ogaado qiiqa ama kaarboon mono ogsaydhka, ama baytariyadda ku jira, waa mamnuuc.

Xarumaha hoygu waxay magacaabi doonaan oo ku wargelin doonaan dadka degen meel loo xayn daabay oo dibada ah halka loo ogolyahay cabbista sigaarka. Iyaddoo wax lagu soo celceliyay ah mooyee, xad gudubka Sharcigan goobta sigaar cabbista ee loo magacaabay *de minimis* (ta ka yar), sida la go'aamiyay iyaddoo ku salaysan dhammaan duruufaha la xidhiidha, sida goobta, looma xisaabin doono sidii u hogaansami la'aan ama joojin.

Xubnaha ka mid ah Qoyska EA waxay sii joogtayn doonaan goobaha noloshadoodu in ay ka xor ahaadaan halisaha dabka. Ka sakow cabbista sigaarka meelaha dibada ah ee loo magacaabay, isticmaalka wax dhinbiilo ah ama qalab ololi kara, ay ku jirto laakiin aanay ku xadidnayn walacaadaha sigaarka laga shito, kabriidka, cuudka, rashka, gaasta la shito ama dhuxusha wax lagu sosho, waa ka mamnuuc meel kasta oo dhismaha xarunta hoyga ah, laga reebo ogolaanshaha la caddeyay ee shaqaalaha xarunta hoyga (tusaale ahaan, shamaca la shito xafladdaha dhalashada, qalabka xaruntu hoygu bixisay ee hilibka lagu dubto ama lagu sosho ee dibada la dhigo, shiditaanka shoolada marka kuwa kale ay bakhtiyaan.)

Xarumaha hoyga, bilaydhada kulal iyo qalabyada wax karinta waxaa laga ogolyahay madbakhyada ama goobaha xaruntu hoygu u magacowday iyaddoo la haysto ogolaanshaha xarunta hoyga. Hudheelada, bilaydhada kulul iyo qalabka kale ee wax karintu waa mamnuuc iyaddoo uu huteelku bixiyo mooyee. Hudheelada, bilaydhada kulul iyo qalabka kale ee wax karinta laga helo meelaha ku lidka ah Sharciga waa lala wareegi karaa, laakiin waa in ay ahaadaan hab edaab leh keliya haddii ay jiraan caddayn in qalabka lagu isticmaalay hudheelka.

## Dhibaatayta ama Luqad Hanjabaada

Ma jiro xubin ka tirsan Qoyska EA (1) hadal ahaan in ay dhibaatayso ama (2) luqad hanjabaad ah ula qasdido degenayaasha kale ama martidda adeeg bixiyayaasha, ama DHCD, hudheelka, ama shaqaalaha xarunta hoyga. Sabab wanaagsan oo xad gudubka oo Sharcigani waxaa laga heli karaa in ay jirto haddii xubin qoyska EA ay kaga jawaabto si qiyaasan daandaansi aan cudur daar lahayn oo ah shaqaale xarunta hoyga ah ama hudheelka.

## Hawl Sharci darro ah

Hawl sharci darro ku ah sharciga maxaliga ah, gobolka ama federaaliga waa ka mamnuuc dusha ama dhismaha xarunta hoyga jaarka dhow.

## Arrimaha Sharci

Xubin Qoyska EA ah waxaa loo arki karaa ku xad gudub sharci haddii qofku baaqi amaah aan la bixin ama soo qabasho maxkameed oo xadhig ah haddii lagu soo saaray gudaha Bulshadda Madaxa banaan ama haddii kale ay qofka ogaysiisay DHCD, taas oo looga baahanyahay in la xaliyo sidii xaalad qorshe dib u guriyayn ah, oo aan lagu xalilin 30 maalmood gudahood ogaysiis sidan ah.

Xalinta arrimaha sharci waxaa lagu ladhi doonaa qorshayaal dib u guriyaynta ah. Iyaddoo taageeradashuruudan, Qoyska EA waxa uu siin doonaa shaqaalaha xarunta hoyga iyo shaqaalaha DHCD xog ku saabsan yeedhmooyin maxkamadda ah ,amarada xayiraada ah – kaas oo uu shakhsigu ku yahay mid uun dacwaysane ama dacweeye – ama amaro kale oo maxkameed ama arrimo sharci oo aan weli go'aan laga gaadhin sida xiliga qiimaynta, waajibaadka taageerada carruurta ama imaanshaha maxkamadda. Xubunta Qoyska EA waxaa looga fekeri doonaa

in uu haysto sabab fiican ku guul daraysiga xalilista arrimo sharci oo aan weli la xalilin haddii isaga ama iyaddu ay bixiyaan warqada cinwaanka qaryaqaanka leh, oo uu saxeexay garyaqaanku, oo ay ku jirto lambarka Guddida garyaqaanka, sheegaysa in ay tahay fikarada garyaqaanka sidii arrin sharci in Qoyska EA aanay xalilayn arrinta sharci ee aan weli go'aanka laga gaadhin.

### Dhexitaanka habeenka

Qoysaska EA waxaa laga filayaa in ay joogaan xarunt la'aanta ama hudheelka habeen kasta iyaddoo dhixitaanka habeenka la ogolaado mooyee ama ay jirto sabab wanaagsan. Qoyska EA waxa uu qaadan karaa **wadarta** afar habeen oo la ogolyahay(dhixitaan habeen) oo ka baxsan xarunta hoy la'aanta ama hudheelka bishiiba, sidii iyaddoo qoyskoo dhan ah. Shakhsiga xubnaha qoyska ka tirsan waxay sidoo kale qaadan karaan dhixitaan habeen oo ka fog meesha sida hoos lagu faahfaahiyay.

Goobaha lagu xoonsan yahay ama xarunta hoyga firidhsan, Qoyska EA waxa uu codsadaa habeen dhax ka fog xarunta hoy la'aanta, haddii ay tahay qoyskoo dhan ama xubin qoyska ka tirsan, waa in la ogaysiiuaa shaqaalaha xarunta hoy la'aanta. Gudaha hudheelka dhixitaan habeen ee Qoyska EA ama xubin qoyska ka mid ah waa in la mariyaa shaqaalaha hudheelka ilaa qofka uu magacaabay Maalulaha Isku xidhahu oo ahaadaa heerka foomka DHCD. Shaqaalaha hudheelka si degdega ayay ugu gudbin doonaan codsiga qofka la magacaabay oo waxay siin doonaa in sidaa loo sameeyay xubin qoyska EA. Xogta ku saabsan cidda uu yahay qofka magacaaban Maamulka Isku xidhka iyo sida loola xidhiidho isaga/iyadda waxa ay ka heli doonaan ka qayb galayaasha miiska hore ee huteel kasta. Qoyska EA ee ku jira hudheelka ee aan qaadan in ka badan 4 dhixitaan habeen ah bishii ka dib markay ku codsadeen ogolaansho ugu yaraan labba maalmood oo shaqo oo la sii hormariyay, ama ka dib sabab wanaagsan marka ay baahida dhixitaanka habeenku ka dib soo baxay, lagama heli doono in ay ku xad gudbeen sharcigan iyaddoo mooyee qoyska ka helay ogaysiis qofka uu magaacabay Maamulka Isku xidhaha ka hor intaan la qaadan habeen dhaxa in codsiga dhixitaanka habeenka la diiday.

Codsiyada habeen dhaxa taas oo baahida ay ka soo baxdo marka Qoyska EA uu ka maqan yahay hudheelka ama xarunta hoyga lagu sameeyo iyaddoo la wacayo shaqaalaha xarunta hoyga ama shaqaalaha hudheelka oo bixinaya sharaxaad qoran si degdega soo noqoshada oo sharaxaya sababta codsiga hore loogu samayn waayay. Xaaladahan, shaqaalaha huteelku si degdega ayay ugu diri codsi qoran shaqaalaha DHCD ee ku habboon iyagoo matelaaya Qoyska EA.

Codsiga dhixitaanka habeenka waa in lagu sameeya ugu yaraan 2 maalmood oo shaqo oo laga soo hormariyay habeen dhaxa la codsaday. Codsiga la sameeyay laakiin aan lagaga jawaabin labba maalmood oo shaqo gudaheed waxaa loo arki doonaa in la ogolaaday. Codsiga habeen dhaxa loo sameeyo sabab wanaagsan in ka yar ogaysiis labba maalmood oo shaqo waa in ay ku jirtaa sababta codsiga habeen dhaxa aan loogu samayn ugu yaraan labba maalmood horteed codsiga oo codsiga waa lagu diidi karaa labba maalmood oo shaqo laga bilaabo taariikhda codsiga. Ka qayb galayaasha ku sii socda habeen dhax iyagoon haysan ogolaansho la sii hormariyay oo degdeg ah in sidaa la yeelo oo la fahansanyahay in habeen dhaxa aan la ogolaan. Ka fekerka codsiyada habeen dhaxa, oo ay ka mid tahay xaaladahan dib u eegda xaqiiqda ka dib, ogolaansho looma diidi doono iyaddoon la sheegin sabab wanaagsan. Waxaa jira fikir ogolaasho ilaa afar habeen bishii sida ay ogolaadeen sharciyadani. Wixii rafcaan maamuleed ah ee u hogaansami la'aan ama joojin ku salaysan dhaxitaanka habeenka qoyska oo aan la ogolayn, ku guul daraysiga DHCD in ay ogolaato codsiga habeen dhaxa waxaa dib looga eegi karaa sababaha lagu sheegay M.G.L. c. 30A, § 14 (7), oo ay ku jirto laakiin aanay ku xadidnayn, ku xad gudubka qadarinta.

Maqnaanshaha xubnaha shakhsiyeed ee Qoyska EA ay ka maqan yihiin xarunta hoy la'aanta ama hudheelka in ka badan 2 habeen oo isku xigta lama ogola, laga reebo marka si cad ay u ogolaato DHCD sabab wanaagsan taa macnaheedu (tusaale ahaan, carruur ka qayb galaysa kaam xagaaga ah, heshiiska haynta, dhigitaan cusbitaal) ama sababo fiican sida lagu go'aamiyay ee waafaqasan sababta wanaagsan heerarka 760 CMR 67.06(6)(a)5. Xarunta hoyga, codsiyada sidan ah waa in loo diraa qofka uu magacaabay Maamulka Isku xidhku iyaddoo la marinayo

shaqaalaha xarunta hoyga lagu qorayo foomka heerka DHCD. Hudheelada, codsiyada sidan ah waa in loo diraa mid uun si toos ah qofka uu magacaay Maamulka Isku xidhaha ah ama iyaddoo la marinayo shaqaalaha hudheelka lagu qorayo foomka heerka DHCD. Codsiga qoran ee ogolaanshaha waa in lagu diraa laakiin aan lagu jawaabin 2 maalmood oo shaqo gudaheed waxaa loo arki doonaa in la ogolaaday. Iyaddoo wax lagu soo celceliyay ah mooyee, xad gudubka Sharcigan oo ah *de minimis* (ta ka yar), sida la go'aamiyay iyaddoo ku salaysan dhammaan duruufaha la xidhiidha, sida wakhtiga iyo goobta, looma xisaabin doono sidii u hogaansami la'aan ama joojin.

Wixii rafcaan maamuleed ah ee u hogaansami la'aan ama joojin ku salaysan dhaxitaanka habeenka qoyska oo aan la ogolayn, ku guul daraysiga DHCD in ay ogolaato codsiga habeen dhaxa waxaa dib looga eegi karaa sababaha lagu sheegay M.G.L. c. 30A, § 14 (7), oo au ku jirto laakiin aanay ku xadidnayn, ku xad gudubka qadarinta.

Goobaha lagu xoonsanyahay ama xarumaha hoyga firidhsan waxa ay hakin karaan ogolaanshaha dhixitaanada habeenka ee la xidhiidha iyaddoo ah ku guul daraysiga Qoyska EA in ay ilaaliyaan sharciyada barnaamijyada iyo shuruudaha.
Codsiyada qoyska oo dham ama in ka badan oo habeen dhax ah oo isku xiga waxaa lagu samayn doonaa foomka TESI-1.

Dhammaan codsiyada DHCD oo ah habeen dhaxyo dheeraad ah oo raacsan sharcigan waa in lagu hagaajiyaa qofka uu magacaabay Maamulka Isku xidhaha ee ku habboon. Shaqaalaha hudheelka waa in ay caawiyaan qoysaska diritaanka codsiyadan qofka uu magacaabay Maamulka Isku xidhaha iyo xogta xidhiidhka ee qofka uu magacaabay Maamulka Isku xidhaha waxaa laga heli doonaa miiska hore ee huteel kasta.

Habeen dhaxyada aan la ogolaan ma samayn doonaan aasaaska ku xad gudubka sharciga, u hogaansami la'an ama joojinta haddii ay jirto sabab wanaagsani maqnaashaha raacsan sabab wanaagsan ee heerarka 760 CMR 67. 06(6)(a)5. Ka fekerka sababo wanaagsan oo uu soo qaaday ka qayb galaha habeen dhax aan la ogolaan, DHCD waxay ka fekeri doontaa dhammaan duruufaha, oo ay ka mid yihiin dedaalada si loo helo ogolaansho habeen dhax ah, iyo tirada habeen dhaxa ah inta lagu jiro muddada la xidhiidha.

Qoyska lagama qufuli doono hudheelka ama xarunta hoyga iyaddoo lagu tuhunsanyahay iskaga tegista guriga qoyska oo dhan oo maqan mooyee ugu yaraan 48 saacadood iyo labba habeen oo isku xiga oo aanay soo wacin hudheelka ama xarunta hoyga ama qofka uu magacaabay Maamulka Isku xidhahu ka hor bandoowga maalinta ka dambaysa maqnaanshaha ee bilaabmay si loo sharaxo sababo wanaagsa oo loo maqnaa in ka badan labba habeen oo isku xiga. Waaxdu waxa codsankartaa caddaynta wakhtiga habboon ee wax sabab wanaagsan oo la xaqiijiyay oo ay soo saaraan ogaysiiska joojinta haddii caddaynta aan si wakhti habboon ah loo bixin. Xaalad kasta oo qaybta aan in dheeraad ah aanay heli karin Qoyska EA iyaddoo sababtu tahay habeen dhaxyo aan la ogolaan, haddii ka qayb galahu uu ku soo noqdo meesha isagoo raadinaya dib u soo gelid, xarunta hoygu ama maamulka huteelku waxay ku wargelin doonaan ka qayb galaha suuragal ahaanshaha helitaanka meel cusub rafcaanka maamul ee aan weli la aqbalin ee raacsan 760 CMR 67.09 (2) (b) 3. ee ku soo noqodka xafiiska DHCD saacada shaqadu jirto. Xaaladahan oo kale, xarunta hoyga ama maamulka hudheelka waxay ku wargelin doonaan DHCD taariikhda iyo wakhtiga uu ka qayb galahu soo noqday.

### Shakhsigu iska leeyahay iyo Nadaafada Qolka

Qoyska EA ma keeni karo in ka badan in u dhiganta labba waa wayn (30 galaan) kiish oo buuxa oo alaab qofku leeyahay ah qofkiiba u sito hudheelka, oo ay ku jirto xaruna firidhsan iyo goobta hudheelka. Qoysaska la yimaada in ka badan inta alaabta la ogoyahay ah, ilaa in ka badan oo wayn (30 galaan) kiish qofkiiba, oo aan isla markaaba haysan meel ay ku kaydiyaan alaabta dheeraadka waxaa la siin doonaa talo ku saabsan ikhtiyaaro kaydinta ah oo suura gal ah todoba maalmood taariikhdood, ama sabab wanaagsan sida lagu go'aamiyay 760 CMR 67. 06(6)(a)5 iyo ka helitaanka ogolaanshaha degdega ah ee qoran qofka uu magacaabay Maamulka Isku xidhaha ah, muddo ka

dheer oo macquul ah (iyagoo ku xisaabtamaya dhammaan duruufaha) si looga saaro alaabooyinka dheeraadka ah. Haddii hudheelka ama xarunta hoygu ay ku guul daraysato in ay bixiso qaybo kayd oo ku filan inta mug ahaan la ogolyahay ee alaabta qofka, Qoysku waxa uu ku siin karaa qayntiisa kaydka ogolaansho qoran ee qofka uu magacaabay Maamulka Isku xidhaha ah. Kayda wax alaab qof iska leeyahay ama alaabooyin ay ka mid tahay qaybaha wax lagu kaydiyo iyo alaabta shakhsiyeed oo xad dhaaf ah muddada todobada maalmood ee u horeeya ee xarunta hoyga, waxay shuruud u tahay u hogaansanaanta dhammaan xaaladaha ku habboon iyo Xeerarka Sixada maxaliga ah iyo Dabka. Iyaddoo wax lagu soo celceliyay ah mooyee, xad gudubka Sharcigan oo ah *de minimis* (ta ka yar), sida la go'aamiyay iyaddoo ku salaysan dhammaan duruufaha la xidhiidha, sida wakhtiga, da'da ilmaha iyo halista ilmaha, looma xisaabin doono sidii u hogaansami la'aan ama joojin.

Ka qayb galayaasha waxaa laga filayaa in ay ka dhigaan qololkooda kuwo nadiif, sixo wanaagsan, oo qaab habaysan ah, laakiin Qoyska EA looma arki doono ku xad gudub sharciga ah haddii baadhitaanka aan laga dhigin mid raacsan sharciga Helitaanka ama Qoyska sabab wanaagsan maalinta baadhitaanka 760 CMR 67. 06(6)(a)5, ama haddii xubin qoyska ah uu buko, habka samaynta ama diyaar garaynta dhar dhiqista, ama wax ku gurida ama ka gurista alaabta shakhsiyeed.
Qoyska EA waxa uu masuul ka yahay ka saarida dhammaan alaabta qof leeyaay marka uu ka guurayo xarunta hoyga.

Qoyska EA ee wareegaya ama ka guuraya xarunta hoyga ama qaybta hudheelka waxa uu kaga tagi karaa xarunta hoyga ama hudheelka, ugu badnaan dhowr shay oo ahmiyad shakhsi leh, si wanaagsan loo xidhay, oo si diyaar ah loogu kaydin karo goob yar oo ka baxsan meesha la dego si loogu simo soo noqosho degdeg ah oo Qoyska EA ah in alaabta loo qaado meesha labbaad ee ay degenyihiin.

Ka dib Qoyska EA marka uu faaruqiyo qaybta, wixii alaab ah ee aan laga saarin xarunta lagu xoonsanyahay ama goobaha firidhsan waxaa lagu guri kiish oo waxaa la hayn 48 saacadood ka hor inta aan cid loogu deeqin ama la iska tuurin. Xarumaha hogya iyo huteeladu waxay haynayaa alaabta in ka badan 48 saacadood wakhtiga la habboonaada aa heshiis ay la gaadhay Qoyska EA.

### Xawayaanada rabaayada ah

Xaywaanada rabaayda ama nooc kasta oo xawayaan aan la ogolayn ah jooga dhismaha xarunta hoyga wakhti kasta, laga reebo xawayaan waraaqaha adeega leh iyo xawayaanda kale ee loo ogolyahay ee raacsan Xeerka Naafadda Ameerika. Mamnuucitaanka waxa ku jira daryeel ku meel gaadh ah oo iyo/ ama booqashada xawayaanada rabaayada ee soo booqanaya. Qoysku looma arki doono ku xad gudub sharcigan mooyee iyo ilaa baadhitaan habboon lagu sameeyay haddii uu xawayaanku yahay xawayaan loo ogolaaday sidii hoyga naafadda. Halka xawayaanka la go'aamiyo in aan loo ogolaan sidii hoy, DHCD waxay bixin doontaa qoraalka ururadda samata bixinta xawayaanada maxaliga ah iyo "dilis ma jirto" xarumaha halkaas oo qoyska oo ay gayn karto si ay ugu noolaato xawayaanka rabaayada ah muddada meelaynta xarunta hoyga ama ay u qaadaan xawayaanka rabaayada ah in ay cid kale rabaysato.

### Qoritaanka Dawada

Qoyska EA waxa uu masuul ka yahay kaydinta iyo maamulka dawooyinka la qoray, ee waafaqsan sababta wanaagsan sida lagu go'aamiyay ee waafaqsan sababta wanaagsan ee heerarka 760 CMR 67.06(6)(a)5.

Haddii khasnad shaqo laga heli karo qolka Qoyska EA ee gudaha hudheelka si loogu kaydiyo dawooyinka, Qoyska EA waxa uu ku kaydsan doonaa daawooyinkaas khasnada. Haddii aanay jirin khasnad shaqo si loogu isticmaalo Qoyska EA qolka la heli karo, xubnaha waa wayn ee qoyska ka tirsan waxay samayn doonaan dedaalka ugu fiican in ay hubiyaan in dawooyinka qoran ay ka baxsanyihiin gaadhitaanka carruurta. Xarumaha hoyga, haddii anay jirin goob badbaado iyo ammaan leh, oo aanay carruurtu gaadhi karin, oo ka fog dareeraha nadiifinta iyo walxaha sunta ah, markaa Qoyska EA waxa uu ka codsan karaa caawimo goobaha lagu xoosan

yahay iyo goobaha firidhsan meel kayd oo badbaado iyo ammaan leh.

Iyaddoo wax lagu soo celceliyay ah mooyee, xad gudubka Sharcigan oo ah *de minimis* (ta ka yar), sida la go'aamiyay iyaddoo ku salaysan dhammaan duruufaha la xidhiidha, sida wakhtiga ama goobta, looma xisaabin doono sidii u hogaansami la'aan ama joojin.

**Dhibaataynta Galmadda**

Dhibaatay galmo oo lagu sameeyo cid kastoo joogta dhismaha xarunta hoyga, oo ay ku jiraan dadka kale ee degen, martidda, adeeg bixiyayaasha, ama shaqaalaha xarunta hoyga, waa mamnuuc.

**Isticmaalka Maandooriyaha**

Isticmaalka ama haysashada khamro ama walax maandooriye ah waa ka mamnuuc dhismaha xarunta hoyga. Isticmaalka khamradda ama walax maandooriye meel ka baxsan barnaamijka, ilaa xadka ay keento dhaqan faragalinaya xubinta Qoyska EA qorshahooda dib u guriyaynta ama hoy kale u helidda, waxay halis gelisaa caafimaadka qof kastoo ku jira dhismaha xarunta hoyga, ama abuuraad rabshad maamulka xarunta hoyga, waa mamnuuc.

Si xun u isticmaalka dawada laguu qoray waxaa looga fekeri doonaa si xun u istcmaal walxa maandooriya ah.

**Dhaqanka dagaalka ah & Ku xad gudubka Ilmaha iyo Dayaca**

Dhaqanada halis geliya caafimaadka iyo badbaada naf, xubnaha Qoyska EA, dadka kale ee degen, martidda, adeeg bixiyayaasha, ama DHCD, hudheelka, ama shaqaalaha xarunta hoygu waa mamnuuc. Tan waxaa ku jira falalka jidheed iyo galmo, dhaqan hanjabaad ah, ama baqdin gelin.

Ma jiro nooc ku xad gudub ilmaha ah ama edbin jidhka ah oo loogu dulqaadan karaa dhismaha xarunta hoyga. Shaqaalaha xarunta hoyga, shaqaalaha DHCD iyo adeeg bixiyayaal kale waa in ay uga warbixiyaan shilalka ku xad gudubka ilmaha iyo dayaca Waaxda Caruurta iyo Qoysaska.

**Booqdayaasha/Martidda**

*Gudaha Xarumaha Hoyga:*
Qoyska EA waxaa dhici karta in uu la kulmo booqdayaasha, wakhti macquula oo xadidan, meelaha ay xarunta hoyga ula muuqato in ay habboontahay, (tusaale, meelaha shakhsigu kula kulmo adeeg bixiyaha). Xarumaha hoyga ayaa go'aamin kara saacadaha habboon ee booqashada.
Qoyska EA waxa uu masuul ka yahay dhaqanka booqdayaasha oo sidaa awgeed waxa uu la xisaabtami doonaa haddii booqdayaashu ay ku xad gudbaan waxii sharciyo ah ama shuruuda ah ee barnaamijka EA ama xarunta hoyga. Ma jiraan booqdayaal habeen ku dhaxaya oo la ogolyahay, laga reebo sida lagu bixiyay Sharciga. Haddii meel laga heli karo xarunta hoyga, shaqaalaha xarunta hoyga, haysta ogolaanshaha DHCD, waxaa ay aqbali karaan habeen dhaxyada booqashooyinka ah ee carruurta aanay meelaha ay degenyihiin ku oolin Qoyska EA, soo bandhiga heshiiska ilaalinta, heshiis ama codsi ay soo saareen DCF, ama amar maxkamadeed oo ku socda xubin qof wayn oo qoyska EA ka mid ah.

Dhammaan codsiyada ku socda DHCD ee booqdayaasha habeen dhaxa ah waa in lagu hagaajiyaa qofka uu magacaabay Maamulka Isku xidhaha ah.

The EA Qoyska waa in uu bixiyaa magaca booqdaha ugu yaraan 24 saacadood horteed iyaddoo xarunta hoyga u aragto in uu ogaysiisku aanu aad u habboonayn moyee.

Booqdayaasha dadka waa wayni waa in ay ka tagaan sawir Aqoonsi, oo ay saxeexaan gelida iyo ka bixida xarunta hoyga. Dadka booqdayaasha ah ee xarumaha qaybaha firidhsan uma baahna in ay bixiyaan sawir Aqoonsi iyaddoo shaqaalaha xarunta hoygu laga heli karo dhismaha mooyee; si kastaba ha ahaatee, Qoyska EA waa in ay weli u diiwaan geliyaan dhammaan booqdayaasha xarunta hoyga shaqaalha xarunta hoyga.

Xarumaha hoygu waxa ay u diid karaan ogalaashaha booqdayaasha la xidhiidha Qoyska EA ku guul daraysigooda in ay adeecaan sharciyada barnamaijka iyo shuruudaha.

*Hudheelada:*
Wax booqdayaal ah looma ogola qololka hudheelka ee loo magacaabay qoyska EA, laga reebo adeeg bixiyaasha la ogolyahay ama xubnaha Qoyska EA kale sida uu ogolyahay Sharcigan. Booqdayaasha waxaa loo ogolyahay goobaha guud ee hudheelada sida uu ogolyahay maaraynta hudheelka xaaladaha la midka kuwan lagu dabaqay martidda aan ahayn EA haddii ay joogaan hudheelka ama aanay joogin marti sidan ah hadda. Ma noqon doonto ku xad gudub sharciga ma jiraan booqdayaal ama ma jiraan marti ee qof keligii si uu ka caawiyo xubin qoyska EA ah gudbinta ama qaadis alaabooyin laga qaadayo qolka qoyska iyaddoo hore loo ogaysiiyay shaqaalaha hudheelka.

Qoyska EA ee la dejiyay huteeka waxaa uu yeelan karaa xubno qoysaska EA ee la dejiyay isla hudheelka sidii kuwa booqdayaal u ah qaybteeda wakhti macquul ah oo xadidan, iyaddoo shuruudu tahay in aanay jirin in ka badan 6 ka qayb galayaal EA qolka hudheelka wakhti hal mar ah, laga reebo xaaladaha marka qoyska inta uu leegyahay ay ka badato 6 qof. Marka qoyska inta uu leegyahay ay ka badato 6 xubnoon, xubnaha qoyska ka badan 6 qof ayaa joogi kara qaybta, laakiin martiddu waxay joogi karaan qolka keliya haddii ay joogto wadarta 6 ama dad ka yar qolka wakhtigaa.

Maqanka la ogolyahay qaban qaabada daryeelka ilmaha marka uu walaidku maqanyahay, carruurta ka yar da'da 16 waxaa keliya ay booqan karaan marka uu la socdo xubin qof wayn ah oo ka mid ah qoyskooda ama marka xubin qoyska ah oo wayn oo ka tirsan qoyskoodu uu dhismaha joogo oo si degdega ay ula xidhiidhi karaan qosyka kale oo EA ama carruurtu telefoon ahaan ama codka carruurtu meel ay gaadhi karto.
Haddii meel laga heli karo qolka huteelkla, Maamulka Isku xidhaha ah qofka uu magacaabay waxa uu ogolaan karaa booqashooyin ku dhixid carruurta ah kuwaas oonay meeshooda koowaad ee ay degen yihiin ka mid ahayn qoyska EA, soo bandhiga heshiiska ilaalinta, heshiis ama codsiga DCF, ama amar maxkamadeed oo ku socda xubin qof wayn ah oo qoyska EA.

Booqdayaasha waxay si buuxda ugu hogaansami doonaan sharciyada barnaamijka EA iyo xeerarka marka ay booqanayaa Qoyska EA.

Ilmo da'diisu tahay 16 ama ka wayn waxa uu booqan karaa xubnaha qoyska EA ee la dejiyay isla hudheelka ama meel guud oo hudheelka ah iyaddoonu la socon qof wayni haddii iyadda/isaga la ogolaaday in uu siiyo daryeelkiisa/keeda ilmaha haddii qof wayni oo ka tirsan qoyskaa ilmaha uu joogo dhismaha hudheelka oo si degdega lagula soo xidhiidhi karo ama codka carruurtu meel ay gaadhi karto.

Xubnaha dadka waa wayn ee qoyska EA waxay masuul ka sii ahaan ilaalilnta caafimaadka iyo badbaada carruurta qoyskooda oo waa in ay sameeyaaan qiysaas wanaagsan oo ku saabsan marka ay badbaado tahay in loo ogolaado carruurtooda in ay booqdaan xubnaha qoyska EA ee kale.

Hudheelada, qofka uu magacaabay Maamulka Isku xidhahu, codsi qoran oo uu gudbiyay shaqaalaha hudheelka wadata nuqul qoyska EA, samayn karaan doorasho macquul ah oo ay ku diidaan booqashada qof xubin ka ah Qoyska EA mid uun martidda ama marti geliyayaasha, iyaddoo ku salaysan xad gudub hore oo ah Sharciyadan. Wax diidmo booqashada ah waa in ay ahaataa wakhti macquul ah oo ku salaysan dabeecada dhaqan, oo waxaa ku jiri doono warbixin qoran oo ah sababta diidmada. Haddii samaynta ikhtiyaarkani in loo diido booqashada si

macquul ah loo sameeyay waxaa lagaga loolami rafcaan maamuleed oo u hogaansanaan la'aan ah ama joojin ku salaysan xad gudubka Sharcigan.

Shaqaalaha hudheelka, shaqaalaha DHCD, iyo shaqaalaha qandaraaslayaasha DHCD iyo wakaalado kale oo gobolka ah oo la shaqaynaya DHCD si ay u joojiyaan booqasho haddii: (a) hawlaha marti geliyahu ay dhibayaan raaxaysiga degen ee martidda hudheelka ama shaqaalaha hudheelka; (b) hawlaha marti geliyaha qaybtu ay ka dhigantahay halis wax ku ah caafimaadka ama badbaada marti geliyaha, qofka martida ah, xubnaha mid uun ah qoyska, ka qayb galayaal EA kale oo la dejiyay hudheelka, ama marti kale oo hudheelka ah, shaqaalaha hudheelka, shaqaalaha DHCD, ama shaqaalaha qandaraas layaasha DHCD ama wakaalada kale oo gobol oo la shaqaynaya DHCD; ama (c) ay jiraan wax ku xad gudub ah oo shariyada EA ama xeerarka oo ka dhacaya qaybta martigeliyaha.
Booqdayaashu waxay u hogaansami doonaa Sharciga Bandoowga iyagoo ka tegaya ka hor wakhtiga bandoowga loo dejiyay oo aan imanayn ka hor 8 subaxnimo, laga reebo xaaladaha daryeelka ilmaha oo la ogolyahay ama sabab raacsan heerarka sababta wanaagsa ee ku jira 760 CMR 67.06(6)(a)5.

*Sabab Wanaagsan:*
Marti gelin booqdayaal aan la ogolayn waxaa loogu cudur daari karaa sabab wanaagsan sida lagu go'aamiyay ee waafaqsan heerarka sababta wanaagsa ee ku jira 760 CMR 67.06(6)(a)5. Ka fekerka sababaha wanaagsan ee uu soo qaado qof marti geliya ah ee martigelinta booqde aan la ogolayn, DHCD waxay ka fekeri doonaan dhammaan duruufaha, ay ku jiraa dedaal warqado u samayn ah si loogu helo ogolaansho booqdaha, oo waxay u baahan doonaan booqdahu in uu ka caawiyo Qoyska EA hawlo lama huraan ah oo xubinta Qoyska EA aanu usamayn karin isagu keligii. Iyaddoo wax lagu soo celceliyay ah mooyee, xad gudubka Sharcigan oo ah *de minimis* (ta ka yar), sida la go'aamiyay iyaddoo ku salaysan dhammaan duruufaha la xidhiidha, sida wakhtiga iyo goobta, slooma xisaabin doono sidii u hogaansami la'aan ama joojin.

### Hubka

Ku haysashada ama kaydsashada nooc kastoo hub dhismaha xarunta hoyga.

### Muhiim:

*Sharciga Guriga:*
Ma jiro wax Sharciyadan Midaysan ay ka mamnuucaan xarumaha hoyga ama hudheelada ee dheegashada Sharciga Guriga hawlaha maalinlaha ah ee xarunta hoyga, sida kaltanadda nadiifinta, waajibaadyada wax karinta, heerarka qayladda, saacadaha la daawado telefeeshinka, habka dhar xidhashada, saacadaha dhar dhiqista, ama shuruudaha gaadhi dhigashada, in dheer ilaa inta Sharciyada Gurigu aanay khilaafin Sharciyadan Midaysan, qawaaniinta EA ama xerarka, ama shuraadaha sharci ee kale. Ku xadgudubka Sharciyada Guriga ee mid uun hoyga ama hudheelka, si kastaba aha ahaatee, loolama dhaqmi doono sidii ku xad gudub sharci oo keenaya helitaan u hogaansami la'aan suuragal ama joojinta dheefaha EA ee raacsan 760 CMR 67.06(5)(a)4. Ku xad gudubka Sharciyada Guriga waxay keeni karaan wareejinta, digniin gudaha ah, ama waayida mudnaanta guriga, sida wakhtiga telefeeshanka, oo ku xad gudub soo noq noqdaa waxa uu keeni karaa dib u habbaynta Qoyshaha Dib u dejin guri ee Qoyska EA in looga baahdo u hogaansanaanta Sharciyada Guriga. Sharciyada Guriga waxay ku sii hoos hadhayaan dib u eegida DHCD iyo ogolaanshaha.

*Xad gudubyada Sharciga aan Loo xisaabin Edaabta:*
Sida lagu sheegay faahfaahinta wayn ee ku jirta 760 CMR 67.05 (e), xad gudubyada la tuhunsanyahay ee Sharciyada, iyo ku guul daraysi la tuhunsanyahay in loo hogaansamo ama la iska kaashada horumarinta xaaladaha qorshaha dib u dejinta guri, waxa la faaruqin doonaa lixda (6) bilood laga bilaano taariikhda ay dhaceen haddii, gudaha muddada lixda bilood ah, u hogaansami la'aan ah ama joojin aan la soo saarin xad gudub kale oo ah wax Sharciyadan ah oo ka dhigan halis wax ku ah caafimaadka ama badbaadada ama dhaqanka

keenaya joojin degdega in la sameeyay oo keentay u hogaansami la’aan ama ogaysiis joojin ah. Sharciyada xad gudubka lagu helo dhegaysiga Sarkaalka DHCD ee rafcaan aanu ka dhicin looguma dari doono sidii xad gudubyo ogaysiisyada u hogaansami la’aanta ama joojinta xigta loomana tirin doona muddada lixda bilood ee hore loo sheegay.

*Isitcmaalka Foomamka:*
**Isuduwayaasha hoy la’aanta waxay siin doonaan Qoysaska EA nuqul Barnaamijyada Sharciyada Xarunta Hoyga Midaysan si ay u qaataan wakhtiga Qoyska EA loo ogolaaday meelaynta.** Xarumaha hoyga ee isticmaalaya Foomka USR-1, Xadgudubka Sharciyada Xarunta Hoyga Midaysan, ee lagu wargelinayo xad gudubka Sharciyada Xarunta Hoyga Midaysan. Hudheelada waxay isticmaalayaan foomka HM-IR1 si ay uga warbixiyaan xad gudubyada Sharciyada Xarunta Hoyga Midaysan. Lambarada ku xad gudubku ee ku yaal foomamku waa hagitaan keliya mana aha kuwo go’aan gaadhid ah tirada dhabta ah ee sharciga xad gudubka marka shil keliya oo ku lug leh xad gudubyo dhowr sharci ah, xarunta hoyga ama hudheelka waa in loo isticmaalaa hal foom in lagaga warbixiyo shilka oo laga hubiyo dhammaan sharciga xad gudubka ku haboon foomla USR-1, gudaha xarunta hoyga, iyo HM-IR-1, gudaha hudheelka.

*Shuruudaha Guud:*

1. Nuqulada sharciyadan, Foomka Daryeela ilmaha markuu waalidku maqanyahay iyo Hagitaanada, TESI-1s, foomka Codsiga Hoyga Macquulka ah ee ADA, iyo foomka Cosdiga Habeen dhaxa ee EA waxaa laga heli doonaa miiska hore e hudheelada iyo xafiiska maamulka xarumaha hoyga iyagoo ku qoran Af Ingiriisi oo loo turjumay luqadahan sharcigu u baahanyahay. Miiska hore ee hudheelada iyo xafiiska maamulka xarumaha hoyga sidoo kale waxay ku dari doonaan xogta ku saabsan sida loo gudbinaayo Foomamka Daryeelka ilmaha iyo Habeen dhaxa iyo codsiyada kale, sida loola xidhiidhayo qofkaa, iyo sida lagu waydiinayo wax ku saabsan heerka codsiga. Huteeladu waxay siin doonaan adeegyada fagaska ka qaybgalayaasha EA lacag la’aan si ay ula xidhiidhaan DHCD, wakaaladaha gobolka ee kale, adeegyada bulshadda iyo adeeg bixiyaha caafimaad, iyo adeegyada sharci.
2. Ku guul daraysiga hudheelka ama xarunta hoyga si loo sii wado oo loogu diyaariyo ka qayb galayaasha nuqul Sharciyadan ah iyo foomamka luqaddo uu sharcigu u baahanyahay waxa ay ka dhignaan doontaa difaaca xad gudubka sharci haddii ka qayba galahu aanu helin nuqul Sharciyada ah luqadda sharcigu uga baahanyahay gelitaanka barnaamijka EA ama heli kara sida turjumaada meelaynta ka horaysa xad gudubka la tuhunsanyahay.

3. Haddii ka qayb galahu muujiyo in dhaqanka ama ka daarida xubinta qoyska EA kaas oo dhaqankiisu ka qayb galaha aanu lahayn sababo xakamayneed ee xad gudubka Sharciyadan ama xeerarka EA, edaabta waa la hakin karaa, haddii ka qayb galahu:
   a. si degdega uga saaro xubintaa qoyska ah inta uu qoysku ka kooban yahay; iyo
   b. ka qayb galahu iyo xubno kastoo wayn oo xubin ka ah qoyska waxay dib u habeeyaan qorshayaashooda dib u guriyanta ah si ay ugu baahdaan in ay qaadaan tallaabooyin macquul ah oo ka mamnuucaya xubintaa hore ee qoyska in uu ku soo noqdo wax xarun hoy ah ma dhismaha hudheelka halkaas oo la dejiyay qoysaska EA, taas oo ay ka mid ahaan karto, haddii ay lama huraan tahay in laga mamnuuco soo noqosho, adeegaysa oo si firfircoon ugu dhaqan gelinaysa iyaddoo isaga ka wakiil ah amar mamnuuc xad gudub raacsan M.G.L. c. 209A ama la kaashanaysa dedaalada xarunta hoyga ama maamulka hudheelka in ay u adeegto oo si firfircoon dhaqan geliso ta ku lid ah xubintaa qosyka ah “ma jiro xad gudub aqal” ogaysiis ah oo raacsan M.G.L. c. 266, § 120 ama amar dhibaatayn ah oo raacsan M.G.L. c. 258E.

4. Kelmadda “sabab wanaagsan,” sida lagu isticmaalo sharciyadan, macnaheedu waa sabab wanaagsan si ay go’aamisay 760 CMR 67.06(6)(a)5 ilaa sababo wanaagsan si gaar ah loo sheego mooye.

5. DHCD waxay bixin doontaa caawimo luqadda ah sida uu sharci u baahdo dhammaan wada xidhiidhka lala yeesho codsadayaasha EA iyo ka qayb galayaasha. Wixii laga soo turjomo Af Ingiriisi waxay muujin doonaan in xaalada khilaafka u dhexeeya qaabka luqadda Ingiriisiga ee warqadda iyo turjumaada, qaabka luqadda Ingiriisigu waxa uu maamuli doonaa, haddii qoyska EA aanay masuul looga dhigi doonin dhaqanka lagu tallaabsaday ee ku tiirsan turjumaad aan sax ahayn.

6. DHCD iyo adeeg bixiyayaasha xarunta hoyga EA, oo ay ka mid tahay hudheelada, waxaa daboola Xeerka Naafadda Maraykanka (ADA) iyo sharciyada la xidhiidha oo mamnuuca takoorka oo u baahan qaar hoy macquula ah iyo dib u habbayno dadka u qalma ee naafadda ah. Haddii dhibaato kaa haysato u hogaansanaanta wax Sharciyadan ah oo ay sababtu tahay naafonimo, waxaad dalban kartaa foomka hoy macquul ah ama dib u habbayn iyaddoo la buuxinayo DHCD ADAH Hoy Macquul ah codsi ah iyo diritaanka iyo warqadda caafimaad ee taageeraya oo ku socda DHCD.